Dadka oo dhan oo loogu deeqayo tallaalka looga hortago hargabka cusub A(H1N1), loona yaqaan hargabka doofaarka (svineinfluensa).

Dadka oo dhan waxaa hadda loogu deeqayaa tallaalka looga hortago hargabka cusub A(H1N1), loona yaqaan hargabka doofaarka (svineinfluensa). Wejigii hore waxaa tallaalka loogu tala galay dadka sida gaarka ah halista ugu jira inay cudurka ku dhibtoodaan iyo shaqaalaha caafimaadka. Hadda deeqdu waxay gaareysaa dadka intiisii kale. Degmooyinka ayaa qabanqaabinaya tallaalka, kuna wargelinaya dadweynaha degmada degan.

Tallaalka Pandemrix waxaa ansaxiyey hay'adaha dawooyinka ee dawliga ah ee Yurub iyo kuwa Norwayba. Waraaqdaan wargelinta ah waxaad ka helaysaa jawaabaha arrimaha muhiimka ah ee tallaalkaan, cidda marka hore loogu deeqayo tallaalka iyo sababta loogu talinayo in la is tallaalo.

Macluumaadkii intaa ka badan ee hargabka cusub A(H1N1) waxaa laga helayaa barta interneetka ee hay'adaha caafimaadka ee dawliga ah www.pandemi.no. Wixii su'aal guud ah waxaa kale oo aad wici kartaa telefoonka macluumaadka cudurrada faafa ee hay'adaha caafimaadka ee dawliga ah 815 550 15.

Maxay masuuliyuuntu ugu talinayaan in dadka oo dhami iska tallaalo hargabka cusub A(H1N1)?

Tallaalka ayaa ah sida uga habboon ee la iskaga difaaco hargabka cusub A(H1N1), loona yaqaan hargabka doofaarka (svineinfluensa).
Dadka intiisa badan hargabku si fudud buu ugu dhacaa, qaar baase si xun ula xannuunsada. Khibradda la helay waxay muujinaysaa in saddex dalool, dalool dadka sida xun ula xanuunsada ee Norway iyo dalalka kaleba aan horey loogu ogeyn khatar ay ugu jireen cudur khatar ah. Sidaas awgeed ayey hay'adaha caafimaadku ku talinayaan in dhammaan dadka da'doodu ka weyn tahay 6 bilood la tallaalo, marka laga reebo dumarka caafimaadka qaba ee uurka 12ka toddobaad ee hore leh (uurka 3da bilood ee hore). Marka lagu tallaalo waxaad kale oo aad gacan ka geysanaysaa in ay xubnaha qoyska iyo kuwa kale ee kugu dhowdhow ka baaqsadaan in la qaadsiiyo hargabkaan. Tallaallada Norway oo dhami waa mid loo madax bannaan yahay.

Tallaalka sida la iskugu xigayo

Mabdi'iyan waxaa tallaalka la hor marinayaa dadka kuwooda yaryar. Haddii degmo haysato tallaal yar marka loo eego baahida, marka la bilaabo in dadka oo dhan la tallaalo, waxaa lagu talinayaa in kooxahaan marka hore la tallaalo:

1. Dad qoyska ka tirsan/xiriir dhow la leh :
- Dadka sida gaarka ah cudurkaan halista ugu jira oo lagala taliyey inay qaataan tallaalka
- Ilmaha 6da bilood ka yar
- Dumarka uurka 12ka toddobaad ee hore leh

2. Dadka aadka ugu dhow doofaarka la dhaqdo

Haddii uu hargabkaani qofka horey ugu dhacay, in laga tallaalo miyaa loo baahan yahay?

Sida caadiga ah hargab kugu dhacay wuxuu kaa difaacayaa in isla hargabkii mar kale kugu dhaco. Dadka aan hubin in ay la xanuunsadeen fayraska hargabka cusub keena, waxaa u roon in ay is tallaalaan. Dadka shaybaarku u caddeeyey in uu ku dhacay hargabka A(H1N1), uma baahna inay is tallaalaan. In la is tallaalo wax dhib ah ka imaan maayo, inkasta oo qofka uu horey ugu dhacay hargabkan cusubi.

Sidee baa loo sameeyey tallaalka cudurkan faafa?

Pandemrix waxaa loo sameeyey sidii caadiga ahayd, iyada oo fayraska lagu beeray ukun. Tallaalku wuxuu ka sameysan yahay qaybo fayraska

hargabka cusub ah, A(H1N1), wax fayrus ah oo noolna kuma jiro. Sidaas awgeed ayaan tallaalku keeneyn in hargabku qofka ku dhaco.

Tallaalku miyuu sugan yahay?

Pandemrix waxaa laga ansixiyey Yurub oo idil, hay'adaha daawada ee dawliga ah ee Norwayna way ansixiyeen. Ansixintaasi waxay ku saleysan tahay qiimeyn ballaaran oo lagu sameeyeyey waxtarka iyo ammaan ahaanta tallaalka.

Daawooyinka oo idili waa ay yeelan karaa waxyeello dambe. Pandemrix wuu keeni karaa in si ka yara xooggan sida tallaalka hargab xilliyeedka uu jirku fal celin ahaan meesha tallaalka lagu muday xanuun, kaar, iyo barar uu sameeyo. Waxyeellada dambe ee caadiga ah sida madax xanuun, daal iyo xumadba way kaga yare badan yihiin.

Maadaama tallaalka lagu beeray ukun, waa in lagala taxadaraa dadka sida aadka ah xasaasiyadda ugu qaba ukunta.

Waxyeellada dambe ee suurtagalka ah, dhif dhifkana ah waxaa keliya oo la ogaan karaa ka dib marka tallaalka loo isticmaalo dad aad u badan. Dal ahaan iyo caalamkaba waxaa la diyaariyey nidaam si weyn arrintaas wax looga ogaanayo.

Tallaalka miyey ku jiraan walxaha wax lagu daro?

Maadaama tallaalka, isaga oo goojooyin badan ah uu ku jiro dhalo, ayaa waxaa ku jira aaladda wax lagu xafido ee tiomersal, iskudhis meerkuri ah, oo leh waxtar ah dilidda bakteeriyada. Arrintaani waa muhiim si loo baajiyo in bakteeriyo ku dhalato dhalada ka dib marka la furo. Waxaa tiomersal oo tallaal ku jirta cilmi-baaritaan ballaaran looga sameeyey kooxo badan oo dad ah. Baaritaanadaasi ma muujin in isticmaalka tiomersal ee tallaalku keenayso wax dhibaato caafimaad ah.

Tallaalka waxaa kale oo ku jira iskujir saliideed oo ka kooban (saliid dabiici ah oo laga helo xayawaanka iyo dhirta oo idil) iyo fitamiin E. Saliiddaan isku jirka ah waxaa loogu darayaa si tallaalka loogu xoojiyo isdifaaca jirka.

Miyaan u baahanahay inaan iska tallaalo hargab xilliyeedka caadiga ah iyo hargabka cusub A(H1N1) ?

Tallaalka cudurkan faafa iyo tallaalka hargab xilliyeedka waxay kala difaacaan fayrasyo kala duwan. Sidaas awgeed ayaa dadka qaar lagula talinayaa inay qaataan labada tallaalba. Tallaaladaan isku mar ayaa la qaadan karaa, midba gacan.

Waa immisa lacagta la isku tallaalayo?

Qiimaha in tallaalkaan la isku duro degmooyinku way ku kala duwan

yihiin. Qeybta qiimaaha qofku ka bixinayo soo geli maayo nidaamka gaaridda xadka lacageed oo daawo iyo dhaqtar lacag la'aan lagu helayo (nidaamka warqadda daawada buluugga iyo xadka qofku ka bixiyo daawada 1) (blåreseptordningen og egenandelstak 1).

Sidee la isku tallaalayaa?

Tallaalka waxaa la iskaga durayaa cududda. Carruurta yaryar tallaalka waxaa looga durayaa bowdada. Labo goojo ayaa lagula talinayaa carruurta da'doodu ka yar tahay 10 sano (kuwa halista ugu jira iyo kuwa kaleba) iyo dadka difaaca jirkoodu hooseeyo. Labada jeer ee qofka la tallaalayo waa inay u dhexaysaa ugu yaraan saddex toddobaad. Dadka kale ee da'doodu ka weyn tahay 10 sano waxaa lagula talinayaa hal goojo marka hore. Waxa dib qiimeyn loogu sameyn doonaa inay jirto baahi goojo kale loogu duro kooxo kale oo dad ah.

Horey u soo qaado lambarkaaga dhalashada (11 lambar) marka lagu tallaalayo. Waa inaad sugtaa qiyaastii 20 daqiiqo ka dib marka tallaalka lagugu duro si loo hubiyo inuusan imaan falcelin xasaasiyad leh.

Sida tallallada kale oo dhan ayuu tallaalka looga hortagayo hargabka cusub yahay mid qaadashadiisa loo madax bannaan yahay, waalidka ayaana oggolaanaya tallaalka ilmaha da'doodu ka yar tahay 16 sano. Ilmaha ka weyn 12 sano wuxuu xaq u leeyahay in sheego fikirkiisa, waalidkuna waa inuu tixgeliyaa fikirka uu ilmuhu qabo.